


AUGUST 2020

Taxanaha Koowaad

# FASHIL WADAREED

*Sida uu Hanaanka Cadaaladda Dembiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno*

HORIZON INSTITUTE

# SABABTA TAXANE LOOGU HIBEEYAY CARUURTA LAGU EEDEEYAY DEMBIYADA

Carruurtu, adduunka oo dhan, waxay ka mid yihiin xubnaha ugu nugul ee bulshada. Innaga oo ah dadka waaweyn, dhammaanteen waxaa inagu waajib ah inaan difaacno. Haddii mas'uuliyaddani ay ku salaysan tahay anshaxa, diinta, caadooyinka dhaqanka ama sharciga, waa xaqiiqo aan laga gabban karin in dadka waaweyn ay tahay in ay hagaan carruurta marka ay korayaan ee ay qaan gaadhayaan. Waxaa udub dhexaad u ah doorkeena ah ka ilaalinta caruurta wixii waxyeelaynaya taas oo ah xasuusashada  in caruurtu ay yihiin caruur. Iyagu uma ay korin jidh ahaan, maskax ahaan ama shucuur ahaanba sida dadka waaweyn oo kale, sababtaas awgeed, waa inaan ula dhaqanno si ka duwan. Waaliddiinta, qaraabada, deriska, macallimiinta, dawladda iyo bulshadu guud ahaanba waxa ay ku leeyihiin qayb ay ka ciyaaraan mas’uuliyaddeena wadar ahaaneed  si aan ugu barbaarinno carruurta sidii ay u noqon lahaayeen muwaadiniin mas'uul ah oo gacan ka geysan kara wanaagga iyo horumarka bulshada.

Ilaa hadda dadka waaweyni waa ay hagradeen carruurta adduunka oo dhan. Somaliland na kama duwana, sida ay muujinayso waayo aragnimada carruurta ay qabsatay hannaanka caddaaladda dembiyadu. Sharciyada Somaliland waxay garwaaqsan yihiin in carruurtu aaanay ahayn qaangaadh isla markaana loo abuuray waajibaad sharci oo ilaaliya carruurta dembiyada gasha. Caruurta da’doodu tahay 14 sano iyo wixii ka yar lama xidhi karo, lama eedayn karo, lama dacwayn karo, lama xukumi karo  xabsina lama dhigi karo. Caruurta ay da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 17 sano waxaa la xidhi karaa oo kaliya marka looga maarmi waayo oo ay noqoto talaabada ugu dambaysa iyo waqtiga ugu gaaban ee suurtagalka ah. Ilaalintan sharciga ah waxaa looga gol leeyahay in lagu hubiyo in hanaanka caddaaladda dembiyadu uu ula dhaqmo carruurta in ay yihiin carruur, oo aan loo tixgelin  kuwo qaangaadh ah oo loo arko uun dambiilayaal. Hadaba, Sharciyadani micno male waxna kama qabanayaan in ay difaacaan carruurta ilaa ay dadka waaweyni ixtiraamaan oo ka shaqeeyaan inay taageeraan.

Mid kasta oo inaga mid ah waxa uu  qayb ka noqon karaa xalka Iyaga oo dalbanaya hannaanka cadaalada dambiyada oo aan dhaawaceyn caruurta. Taxanahani waxa uu isku dayayaa inay bulshadu marin u hesho waayo aragnimada caddaalad darrooyinka ku dhaca carruurta la xidhay, la hayay ee la eedeeyay. Taxanahan ayaa sidoo kale soo bandhigaya talo soo jeedinno macquul ah oo ku saabsan waxa loo baahan yahay in la fuliyo si loo abuuro nidaam ka sii caddaalad badan ficil ahaan, iyada oo laga shaqeynayo in la

ixtiraamo sharciga ruuxdiisa iyo qoraalkiisaba labadaba. Waxa uu ka kooban yahay shan mowduuc: (1) Sababta ay eedaynta carruurta 14 jirka ah iyo ka yar ay sharci darro u tahay; (2) Sida ay ku haynta carruurta ee saldhigyada booliiska ka hor iyo inta dacwaddu socoto ay u ciqaabto ka hor inta aan xitaa la xukuminba; (3) Sida ay carruurtu ugu muteystaan xukunno culus dambiyo fudud; (4) Sida hannaanka cadaaladda dembiyadu uu ugu shaqeynayo bedelka mas'uuliyadaha qoyska, wax ka qabashada bulshada iyo wadajirkeeda, adeegyada waxbarashada iyo adeegyada bulshada iyo (5) dadka/hay'adaha ka shaqeeya nidaamka caddaalad ciqaabeedku waxa ay samayn karaan hadda iyaga oo ka duulaya inta yar ee khayraadka ay haystaan ah si ay u xaqiijiyaan in ilma kasta loola dhaqmo in uu yahay ilma yar. Sharcigu wuxuu ballanqaadayaa inuu difaaco oo uu ixtiraamo dhammaanteen, oo ay qayb ka yihiin carruurta dembiyada gashay. Waa waajib inna wada saaran in aan hubinno in sharcigu u adeego qof walba.

# TAXANAHA KOOWAAD:

## CIQAABISTA DEMBI EE CARUURTA LOO TIXGELIYAY IN AY AAD U DA' YAR YIHIIN KUWAAS OO AAN SI BUUXDA U KALA FAHAMSANAYN SAX IYO QALAD

*Caruurta da'doodu tahay 14 sano ama ka yar waqtiga ay galeen dambi, sida sharciga Somaliland qabo, lama xidhi karo, lama eedayn karo, dacwad laguma soo oogi karo, xabsina lama dhigi karo. Laakiin si caadi ah ayaa loo xidhaa, loo eedeeyaa, dacwad loogu soo oogaa xabsi la dhigaa.*



*Maxamed oo la jooga gurigooda hooyadii Ikraan.*

Mohamed Ibrahim Hussein[1] wuxuu jiray 14 sano markii lagu xidhay magaalada Hargeysa. Booliisku waxay galeen gurigooda iyagoo raadinaya. Laakiin hooyadiis, Ikran, waxay booliska u sheegtay in aanay ogeyn halka uu joogo. Kadib boolisku waxay tageen iskuulkiisii; maamulaha ayaa isla jawaabtii mid la mid ah bixiyay, isagoo leh ma ogi halka Maxamed joogo. Labadooduba aad bay uga cabsi qabeen in ay booliisku la hadlaan Maxamed. Ma ayna dooneynin in la xidho. Booliska ayaa ugu dambeyntii ku hanjabay in

[1] Maxamed waxa ay *Horizon* u fidisay kaalmo sharci. Hooyadii ayaa saxeexday ogolaansho ah in la baahiyo sawirkiisa iyo sheekadiisa iyada oo ka rajo qabta in tusaalahani uu wanaajiyo sida hanaanka cadaalada dembiyadu ula dhaqmo caruurta.

ay xidhayaan Ikran haddii aanay wiilkeeda u dhiibin booliska.[2] Sababtoo ah waxay haysatay gabadh yar oo aanay keligeed ka tegi karin, waxay u qaaday Maxamed saldhigga booliiska. Boolisku isla goobtii ayey ku xidheen isagoo lagu soo eedeeyay in uu xaday taleefan. Caddaynta kaliya ee ay haysteen ayaa ahayd qof ayaa dacwaynaya. Maxamed waxa ay ka soo qaadeen hooyadiis waxayna ku xidheen qol.

5 bilood, ayey boolisku ku xidheen isaga saldhiga booliska Maxamed Mooge ee Hargeisa, Maxamed ma ay xukumin maxkamadda sharciga ah. Waa la hayay intii ay boolisku isku dayayeen in ay raadiyaan caddeymo dheeraad ah. 5 taa bilood Maxamed wuxuu ku noolaa qol yar oo shub ah oo ay kula jiraan caruur kale oo lab ah iyo rag waaweyn oo lagu soo eedeeyay dambiyo. Xoriyadiisii ayuu waayay. Wuxuu ku seegay iskuulka. Ma aanu haysan wax uu akhristo oo uu wax ka barto. Hooyadiis waxa ay ku qasbanayd inay u keento cuntada saddex jeer maalintii. Muddo 5 bilood ah, noloshiisii, iyo nolosha qoyskiisa, ayaa gebi ahaanba is beddel ku dhacay. Laakiin masiibada dhabta ah ee naxdinta leh ee sheekadiisan ayaa ah in Maxamed aanay marnaba ahayn in la xidho oo lagu hayo saldhigga booliiska marka horeba, maxaa yeelay isagu wuxuuba jiray 14-sano oo keli ah.

Caruurta da'doodu tahay 14 sano ama ka yar marka la sheego in ay galeen dambi lama xidhi karo, lama eedayn karo, dacwad laguma soo oogi karo maxkamadina ma ciqaabi karto.

Sharcigan waxa ku jira sabab wanagsan. Qofku, ha ahaado ilmo yar ama qof weyn, si loogu xidho masuuliyada dambi, waa in ay si buuxda u fahamsan yihiin waxa ay sameynayaan iyo cawaaqibka suurtagalka ah ee ka dhalan kara ficiladooda. Haddii aanay fahamsanayn, markaa sharciyan laguma ciqaabi karo xabsina looma diri karo. Tani waa sababta aanay maxkamaduhu aanay u xukumi karin dadka qaba xanuunada dhimirka.[3] Isla Mabda 'aa aasaasiga ah ayaa lagu dabaqayaa carruurta 14 sano jirka ah iyo kuwa ka sii da' yar. Awoodooda maskaxeed ayaa ka hor istaagta in ay si buuxda u kala gartaan waxa sax ah iyo waxa khaldan sidaa darteed ayaan loogu ciqaabi karin ciqaabaha dambiyada.

Tani waa hal dariiqo oo innagu bulsho ahaan aan u daryeelayno carruurta yar yar. Somaliland waxay dooratay in da'da ugu yar ee ciqaabta dembiyada ee caruurtu ay ku habboon tahay 15 sano jir. Sharcigani wuxuu koobsanayaa go'aankeena loo dhan yahay ee ah in carruurta da'doodu tahay 14 sano ama ka yar ay weli korayaan oo aanay si buuxda u kala saari karin saxa iyo khaladka. Sidaas awgeed, si buuxda aanay u fahmi karin waxa ay bulshadu u oggoshahay iyo waxa ay bulshadu cambaareynayso ama gebi ahaanba u sahlaysa fahamka natiijada ka dhalan karata ficilladooda. Iyagu ma laha waayo aragnimadii iyo sababayntii lagu fahmi lahaa in ay dambi samaynayaan. Markaa booliska, xeer ilaalinta iyo maxkamaduhu ma ciqaabi karaan.

[2] Tani waa caado caam ah oo ay boolisku adeegsadaan si loogu khasbo qof lagu soo eedeeyo dambi, gaar ahaan wiilasha iyo ragga dhallinyarada ah, in ay iskood isu keenaan ama qoyskooda u soo celiyaan. Waxaana loo yaqaanaa xadhiga wakiilka ama afduubka la haystayaasha. Waana sharci darro marka loo eego qodobka 26 aad ee dastuurka Somaliland.

[3] Qodobka 50aad, Xeerka Ciqaabta Somaliland (1962).

In carrurta sidan loola dhaqmaa waxa ay u muuqan kartaa cadaalad darro, khalad ama mid si qumman aan loo hagin, gaar ahaan haddii ilmaha lagu eedeeyo dambi aad u khatar badan sida kufsiga iyo dilka. Laakiin waxa uu u adeegayaa ilaalinta caruurta, kuwaas oo sida cad aan lahayn qaan gaadhnimadii daruuriga u ahayd ciqaabta fal dembiyeedka. Somaliland dhexdeeda, waalidiinta ama hanaanka dhaqanka ayaa awooda oo ay tahay in ay la xisaabtamaan caruurta 14 sano jirta ama ka yar, marka ay khalad sameeyaan.[4] Laakiin sharcigu waxa uu si cad uga mamnuucayaa booliiska iyo maxkamaduhu in ay iyagu maareeyaan kiiskaa, sida ay u maamulaan kiisaska la midka ah ee ay galaan dadka waawayn, iyo in lagu xidho caruurta saldhigyada booliiska iyo xabsiyada halkaas oo lagula xidho dad waaweyn.

U dammaanad qaadista carruurta ee amniga uu sharcigani siinayo waa in ay ahaato mid  fudud. Mase aha. Gudaha Somaliland, da'da saxda ah ee ilmaha badanaa lama caddeeyo sababta oo ah, kiisaska badankooda, ma jirto caddeyn qoraal ah sida shahaadada dhalashada. Warbixinta booliisku badanaa waxay u diiwaangelisaa carruurtu in ay 15 jir yihiin ama ka weyn yihiin xeer ilaaliyayaasha iyo garsoorayaashu badanaaba waxay tan ku aqbalaan qiimeyn ahaan. Haddii warbixinta booliisku u qorto ilmaha 15 sano jir ama ka weyn, laakiin waalidka ama ilmaha midkood yidhaahdaan waa 14 sano ama ka yar, waalidka ama qareenku  waa in ay caddeeyaan da'da ilmaha. Laakiin tani aad bay u adag tahay mar hadii  dukumenti muujinaya da'da aan sida caadiga ah la hayn. Markii da'da ilmaha la xidhay la is weydiiyo, aanay jirin na caddeyn qoraal ah, garsooruhu wuxuu amri karaa baadhitaan caafimaad si loo ogaado da'da. Qaabkan wuxuu u muuqdaa siyaasad mug leh, ilaa aad ka baaraan degto. Caruurtu waxay u koraan jidh ahaan heerar kala du-duwan. Ilmo 14 sano jir ah wuxuu si sahlan ugu ekaan karaa 15-sano jir amaba xitaa 16-sano jir. Marka baadhitaanka da'du si qaldan uga dhigto in ilmuhu yahay 15 sano jir ama ka weyn, oo aanay jirin caddeyn kale oo da'da ah, waxay macnaheedu tahay in ilmo bulshadu u aqoonsan tahay inuu aad uga yar yahay da'dii dambiga galaysay uu ku qaadan doono sannado badan xabsiga.

Maxamed wuxuu jiray 14 sano markii la xidhay. Hooyadiis waxay heshay kaalmo sharci waxayna da'diisa u caddeysay maxkamad ku taal Hargeysa waana la sii daayay. Wuxuu ku noqday gurigii isaga oo weheshanaya hooyadiis iyo walaashiis wuxuuna bilaabay inuu mar kale dugsiga tago. Maxamed ayaa ugu dambeyntii helay ilaalinta sharciga, laakiinse kadib markii si qalad ah loogu hayay saldhig boolis muddo 5 bilood ah.

[4] Da'da carruurta lagu fulin karo cadaalad dembi waa mid aad u kala duwan 6 ilaa 18 sano jir waddan ilaa waddan. Sida dalal kala duwan ula macaamilaan carruurta loo arko inay aad ugu yar yihiin ciqaabaha dambiyadu sidoo kale way kala duwan yihiin. Qaarkood waxay bixiyaan hanaan gaar ah oo lala xisaabtamo oo loogu talagalay in uu noqdo mid ku haboon caruurta una shaqeyn kara si aad ula mid ah hanaanada cadaaladda ee dambiilayaasha iyada oo xadhiggu yahay xulasho xukun. Eeg, Dib-u-habeynta *Caalamiga ah ee Cadaaladda*, *Warbixinta Cadaaladda Caruurta: da'da ugu yar ee mas'uuliyadda dembiga*, (2013).



*Maxamed wax baranaya oo jooga guriga.*

# Xabsiyeynta Todobaado, Bilo iyo Xitaa Sanado ee Saldhigyada Booliska iyo Xabsiyada

Sida Maxamed oo kale, carruurta kale ee aadka uga yar in la xidho, in la soo eedeeyo, in dacwad lagu soo oogo iyo in xabsi la dhigo ayaa bilo ku qaatay saldhigyada booliiska iyo xabsiyada.

Dhamaan caruurtan hoos ku taxan waxa ay *Horizon* ka heleen kaalmo xagga sharciga ah. Waxayna matalaan muunad ah caruurta 14 sano jirka ah ama ka yar oo lagu soo eedeeyey dambiyo ka dhacay goobo ka mid ah Somaliland oo ay ka hawlgasho *Horizon*. Magacyada koowaad oo kaliya ayaa la isticmaalay si loo ixtiraamo asturnaantooda.

Da'dan hoos lagu taxay waa kuwo ay siiyeen *Horizon* caruurta iyo waalidkoodu. Iyadoo aan la hayn hab lagu kalsoonaan karo oo lagu xaqiijiyo da'da marka Somaliland la joogo, waxaanu siinnay carruurta iyo waalidkooda faa'idada shakiga waxaanan ka caawinay in ay isku dayaan in ay caddeeyaan da'da. Haddii waalidku heli waayo caddeyn ah in ilmahoodu ahaa 14 sano jir ama ka yar, ama go'aanka da'da lagu caddeeyay in ilmuhu 15 sano jir yahay ama ka weyn yahay, kiisku wuxuu hore ugu sii gudbayaa maxkamadda xitaa haddii ilmaha iyo waalidku weli muran ka qabaan.

Dhamaan wiilashan soo socda ayaa waqti ku qaatay saldhigyo booliis iyo xabsiyo kala duwan oo ku yaal Hargeysa iyo agagaarkeeda.

- Salmaan (13) waxaa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho kadib markii lagu eedeeyay in uu dhagax ku tuuray haweeney. Waxaa la xidhay 5 bilood ilaa aabihiis uu ku guuleystey caddeynta da'diisa maxkamaduna waxay amartay in lasii daayo bishii Juun 2019.

- Barkhad (14) waxaa loo qabtay dagaal waxaana lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Daloodho. Halkaas waxaa lagu hayey muddo bil ah ilaa laga sii daayay sababta oo ah heshiis dhaqan oo la isku afgartay bishii Oktoobar 2019.

- Axmed (14), Cumar (14) iyo Saciid (14) ayaa loo xidhay markii lagu eedeeyay in ay xadeen taleefan. Maxkamad ku taal Hargeysa ayey u cadaatay in aanay wax dambi ah lahayn oo ay amartayna in laga siidaayo Saldhigga Booliska ee Daloodho bishii Febraayo 2020 laakiin waa markay 7 bilood oo dhan ku xidhnaayeen ka dib.

- Cumar (14) ayaa la xidhay laguna hayay Saldhigga Booliska ee Daloodho kadib markii lagu eedeeyay in uu xaday taleefan. Ma aanu caddeyn karin da'diisa. Waxaana lagu xukumay xatooyo bishii Oktoobar 2019 waxaana lagu ciqaabay 1 sano oo xabsi ah.

- Xamse (13) waxaa loo xidhay budhcadnimo, waxaana lagu xidhay saldhigga booliska ee Daloodho bishii Febraayo 2020. Wuxuu sheegay inuu 13 sano jir yahay laakiin muu hayn wax cadeyn ah. Maxkamadda Gobolka Hargeysa waxay ku xukuntay 2 sano iyo lix bilood. Maxkamadda Rafcaanka ayaa taageertay xukunkan. Wuxuu xukunkiisa ku qaadanayaa Xabsiga Mandheera.

- Maxamed (14), Xasan (14) iyo Axmed (14) ayaa 2 bilood lagu hayay Saldhigga Dhexe ee Booliska Hargeysa ka hor inta aanay maxkamaddu ku waayin in ay taleefan xadeen bishii Abriil 2019.

- Ismaaciil (14) waxaa lagu soo eedeeyay in uu dhaawac u gaystay qof waxaana lagu hayay Saldhiga Dhexe ee Booliiska Hargeysa. Waxaa la siidaayay bishii Abril 2020, markii ay reerkiisu heshiis dhaqan la gaadheen cidii haysatay, waase kadib markii uu ku qaatay in kabadan 2 bilood oo xadhig ah.

- Maxamed (14) iyo Cabdiqani (14) ayaa loo xidhay in ay dagaalameen. Waxaa lagu hayay Saldhigga Booliska ee Kood Buur muddo dhan 8 bilood illaa laga sii daayay Oktoobar 2019.

- Saddam (14) ayaa la qabtay oo lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Kood Buur. Ma aanu caddeyn karin da'diisa. Waxa ay ku xukuntay maxkamad ku taal Hargeysa xatooyo bishii Nofembar 2019 waxaana lagu ciqaabay 3 bilood oo xabsi ah.

- Cabdicasiis (14), Cabdiraxmaan (13), Xamse (12) iyo Mubaarik (14) ayaa la xidhay bishii Diseembar 2019 waxaana lagu hayay Saldhigga Booliska ee Kood Buur. May keeni karin caddeyn da'dooda ah. Waxaa lagu xukumay inay dhaawaceen qof waxaana lagu ciqaabay 7 bilood oo xabsi ah.

- Yuusuf (14) wuxuu ku qaatay 3 bilood saldhigga Booliska Kood Buur uuna ku eedaysanaa in uu dhaawac u geystay qof ka hor intaan maxkamad ku qanacday in aanu dembiga samayn, waxayna amartay in la sii daayo Janaayo 2020.

- Saddam (13), Suhayb (13), Guuleed (13), iyo Khadar (13) ayaa la xidhay laguna hayay Saldhiga Booliska Kood Buur kuna eedaysnaayeen in ay dagaallameen. Waxaa la siidaayay 2 todobaad kadib markii heshiis dhaqameed la gaadhey bishii Meey 2019.

- Cabdiqani (13), Sacad (13), Yuusuf (14), Ridwaan (12), iyo Suhayb (11) ayaa lagu soo eedeeyay in ay xadeen taleefan waxana lagu hayay Saldhiga Booliska Kood Buur bishii Juun 2019. Waxaa lasii daayay kadib hal toddobaad, markay qoysaskoodu heshiis dhaqameed la galeen qofkii iyaga dacweynayay.

- Xamse (14) iyo Haashim (12) ayaa la xidhay laguna hayay Saldhiga Booliska Kood Buur kuna eedaysnaayeen in ay dagaallameen. Waxaa la hayay ku dhawaad hal bil ka hor inta aan qoysaskoodu gelin heshiis dhaqameed waxaana la sii daayay Sebtember 2019.

- Cabdicasiis (14) waxaa lagu xidhay laguna hayay Saldhiga Booliska Kood Buur bishii Diseembar 2019. Sii dayntiisu waxay ku salaysnayd heshiis dhaqameed la gaadhay bishii Febraayo 2020.

- Hanad (14) ayaa la xidhay oo lagu hayey Saldhigga Booliska ee New Hargeysa. Ma aanu caddeyn karin da'diisa. Waxaana lagu xukumay budhcadnimo, waxaana lagu ciqaabay 2 sano oo xabsi ah Abriil 2019.

- Axmed (14) ayaa la xidhay laguna hayay saldhiga booliska ee New Hargaysa kadib markii uu dhagax ku tuuray qof. Waxaa halkaas lagu hayey muddo dhan hal 1 bil ilaa qoyskiisu ay heshiis dhaqameed la galeen dhibanaha waxaana la sii daayay bishii Luulyo 2019.

- Mustafe (14), Mohamed (14), Hassan (13) iyo Fadxi (13) ayaa lagu hayay Saldhigga Booliska ee New Hargaysa kadib markii lagu soo eedeeyay in ay dhaawaceen qof. Waxaa lagu hayay saldhiga booliska muddo ku dhow 2 bilood ka hor inta aaanay qoysaskoodu gaadhin heshiis dhaqamed waxaana la siidaayay bishii Luuliyo 2019.

- Badri (10) ayaa la xidhay laguna hayay Saldhigga Booliska ee New Hargeysa in ka badan 2 bilood. Wuxuu dhaawacay haweeney. Booliisku way hayeen illaa hooyadiis – oo ah ganacsatada wadhatada ah – ay siisay dhibanaha magtii. Markay sidaa yeeshay ayaa, waxaa la siidaayay bishii Febraayo 2020.

- Maxamed (14) waxaa lagu xidhay laguna hayay Saldhigga Booliska ee New Hargeysa isagoo ku eedaysan in uu dagaallamay. Waxaa la siidaayay hal bil kadib taas oo lagu saleeyay heshiis dhaqameed bishii Maarso 2020.

- Khaliil (14) waxaa lagu xidhay laguna hayay Saldhigga Booliska ee New Hargeysa bishii Maarso 2020. Ma aanu caddeyn karin da'diisa. Waxaana lagu xukumay budhcdnimo wuxuuna hadda gudanayaa ciqaab 1 sano iyo 6 bilood oo xabsi ah.

- Ciid (13) ayaa la xidhay oo lagu hayay Saldhigga Booliska ee New Hargeysa. Muddo 1 bil ah ka dib markuu ku jiray saldhigga booliiska, sii dayntiisa waxaa lagu saleeyay heshiis dhaqameed bishii Juun 2020.

- Khaalid (12), Sakariye (13) iyo Liiban (13) ayaa dhamaantood la xidhay laguna hayay Saldhiga Booliska Qudhac Dheer bishii Feebaraayo 2020. Waxaa lagu eedeeyay in ay sida la sheegayo ay dab ku shideen daasad sunta cayayaanka ah, taasoo dhaawacday haweeney. Waxaa la sii daayay isla bishaas taas oo ku saleynayd heshiis dhaqameed.

- Ayaanle (12) ayaa la xidhay kadib markii ay haweeney sheegatay in uu iyada lacag ka xaday. Waxaa lagu hayay Saldhigga Booliska ee Qudhac Dheer waxaana la sii daayay 1 toddobaad ka dib markii qoyskiisu ay heshiis dhaqameed la galeen haweeneyda bishii Maarso 2020.

- Cabdirashiid (13) waxaa lagu xidhay lagana hayay Saldhiga Booliska ee Qudhac Dheer kiiyoo ku eedaysan in uu dagaallamay bishii Maarso 2020. Waxaa la sii daayay isla bishaas iyada oo lagu saleynayay heshiis dhaqameed.

- Yaasiin (13) waxaa lagu xidhay laguna hayay Saldhigga Booliiska Adan Shiine ee magaalada Hargeysa kuna eedaysnaa in uu dagaallamay. Waxaana la sii daayay 1 toddobaad ka dib taas oo ku salaysnayd heshiis dhaqameed bishii Febraayo 2020.

- Keyse (14) waxaa loo xidhay in uu dagaalamay wuxuuna todobaad ku qaatay Saldhiga Booliska ee Cabdi Iidaan ka hor inta aanay waalidkiisu heshiis dhaqan la gaadhin, waxaana la sii daayay Oktoobar 2019.

- Nasrudiin (14) ayaa la xidhay oo lagu hayay Saldhigga Boliska ee Cabdi Iidaan kuna eedaysnaa tuugo. Ma aanu caddeyn karayn da'diisa. Waxaana la xukumay bishii Nofeembar 2018.

- Amiin (14) waxaa la xidhay bishii Febraayo 2020 waxaana lagu hayay Saldhigga Booliska ee Cabdi Iidaan. Ma aanu caddeyn karin da'diisa waxaana lagu xukumay budhcadnimo waxaana lagu ciqaabay 18 bilood oo xabsi ah.

- Yaxye (14) waxaa lagu xidhay laguna hayay Saldhigga Booliiska Sheekh Nuur bishii Janaayo 2020. Maxakamadda Degmadda Hargeysa ayaa ku xukuntay tuugo kuna ciqaabtay 5 bilood oo xabsi ah.

- Yacquub (14) waxaa xukuntay maxkamad ku taal magaalada Hargeysa isagoo lagu eedeeyay in uu xaday taleefan bishii Feberaayo 2020. Hooyadiis wax dukumenti ah oo da'diisu ku qoran tahay may hayn mana ay hubin in uu yahay 14 sano ama 15 sano jir, sidaa darteed way diiday in ay ku dhaarato maxkamada iyadoo kitaab gacanta saaraysa. Wuxuu ciqaabtii xukunkiisa ku gudanayaa Xabsiga Hargeysa.

- Ismaacil (13) waxaa lagu xukumay budhcadnimo waxaana lagu ciqaabay 3 sano oo xabsi ah kuna guto xabsiga Hargeysa. Dacwaddiisa waxaa la hor keenay Maxkamadda Rafcaanka Maroodi-jeex wayna sii daysay iyada oo ku salaysay da' diisa darteed Maarso 2020. Ismaaciil waxa uu hal sano ku soo qaatay xabsiga

- Ayaanle (13) waxaa ay ku xukuntay Maxakamada Gobolka Hargeysa kufsi bishii May 2020. Isagu waa ilmo darbi jiif ah mana laha waalid gacan ka siiya in uu caddeeyo da'diisa. Wuxuu hadda gudanayaa ciqaab 7 sano oo xabsi ah Xabsiga Magaalada Hargeysa.

- Cabdisalaam (14) waxaa xukuntay Maxakamadda Gobolka Hargeysa waxa uu ku eedaysanaa in uu qof ku dhaawacay mindi bishii May 2020. Waxa lagu xukumay ciqaab 3 sano oo xabsi ah, Xabsiga Magaalada Hargeysa.

- Xamse (9) oo ay dukumentiga maxkamadda ugu qoran yihiin in uu yahay 15 sano jir. Laakiin wuxuu u muuqday mid aad uga yar oo kuna andacoonayay in uu jiro 9 sano oo kelya. Ma ay jirin go'aan khuseeya da' diisa oo maxkamadeed waxaana lagu xukumay xatooyo isaga oo aanay qareen ama waalid la joogin sanadkii 2019. Waxaa lagu ciqaabay 1 sano oo xadhig ah sababtoo ah waxa lagu helay xatooyo lacageed. Wuxuu xukunkiisii ku qaatay Xabsiga Mandheera waxaana la sii daayay bishii Feebraayo 2020.

- Cabdiqani (14) waxa ku xukumay xatooyo garsoore jooga Hargaysa waxaana loo diray inuu 2 sano oo ciqaab xabsi ah ku soo guto Xabsiga Mandheera. Ka dib Racfaan qaadasho ayaa, garsooruhu ka yareeyay ciqaabtii xukunkiisa waxaana la siidaayay Abril 2020. Laakiin da' yaraantiisa marnaba lama aqoonsan wuxuuna ku soo qaatay 10 bilood oo xabsi ah.

Caruurta ayaa sidoo kale Hargeysa lagu xidhaa Xarunta Laanta Dembi Baadhista (CID), iyaga oo la xidhan dad waaweyn oo ku eedaysan dambiyo aad u khatar ah sida kufsi, dil iyo argagixisonimo.

- Suhayb (14), Cabdiqani (14) iyo Xamse (14) ayaa la xidhay oo lagu hayay CID da magaalada Hargeysa bishii Sebtember 2019. Maxkamad ayaa heshay in aanay jirin wax ku caddaynaya in ay xadeen taleefan wayna sii daysey. Laakiin waxay ahayd oo kaliya markii ay 4 bilood ku jireen CID da.

- Maxamuud (14) waxaa lagu hayay CID-da Hargeysa 8 bilood. Waxaa loo qabtay inuu markhaati ka yahay dil. Maxkamaddu waxay ugu dambeyntii amartay in la sii daayo Noofembar 2019.

- Cawaale (11) waxaa lagu xidhay CID da Hargeysa markii lagu eedeeyay in uu xaday lacag. Waxaa la hayay 1 bil ka dibna lagu sii daayay heshiis dhaqameed Juun 2019.

- Cabdinajiib (13) waxa uu la degenaa eedadiis ilaa dhallaanimadiisii maxaa yeelay waalidkiisu may daryeeli karayn. Waxaa xidhay CID-da Hargeysa waxaana lagu xukumay fal dembiyeed kufsi ah bishii Janaayo 2020. Dukumitiyada maxkamadda ayaa sheegaya in Cabdinajiib uu yahay 15 sano jir. Eeddadii waxay leedahay waa 13-sano jir laakiin iyadu wax caddayn ah uma hayso da'diisa. Maxakamada Gobolka Hargeysa waxa ay ku xukuntay 4 sanadood oo xabsi ah, ka dibna maxkamada Rafcaanka ayaa xukunkiisi ka yaraysay kana dhigtay 3 sano iyo 4 bilood. Ciqaabtii xukunkiisa ayuu gudanayaa wuxuuna ku jiraa Xabsiga Magaalada Hargeysa.

Dhibaatadani kuma koobna oo keliya magaalada caasimada ah ee Hargeysa. Waxa ay ka dhacdaa magaalooyinka kale ee waawayn iyo magaalooyinka yaryar.

- Cabdiwakiil (14) iyo Cali (13) ayaa lagu xidhay laguna hayay Saldhiga Dhexe ee Burco iyagoo ku eedaysan in ay dagaallameen. Waxaa la sii daayay 2 todobaad kadib markii qoysaskooda ay ku heshiiyeen heshiis dhaqameed Abriil 2019.

- Cabdirisaaq (14) waxaa lagu hayey Xabsiga Magaalada Burco muddo 4 bilood ah ka hor intii aan maxkamada magaalada Burco ku xukumin in uu gaystay fal dembiyeed budhcadnimo ah Sebtember 2019.

- Cabdi (14) waxaa ay ku xukuntay maxkamad ku taal Burco budhcadnimo waxaana lagu ciqaabay 3 sano oo xabsi ah bishii Maarso 2020.

- Axmed (13) ayaa la xidhay oo lagu hayay xabsiga Burco isaga oo ku eedaysan in uu dhaawacay qof. Wuxuu halkaas ku jiray ilaa 2 toddobaad kadib qoyskiisa ayaa gaadhay heshiis dhaqameed Meey 2020.

- Suleymaan (13) ayaa la xidhay waxaana lagu hayay xabsiga magaalada Burco kadib markii lagu eedeeyay in uu telefoon xaday. Waalidkiisa ayaa bixiyey lacagtiii taleefanka waxaana la siidaayay ka dib 1 todobaad oo xabsi ah Juun 2020.

- Xamse (14) waxaa ay ku xukuntay budhcadnimo Maxakamad ku taala Wajaale. Waxaa lagu ciqaabay 8 bilood oo xabsi ah bishii Luulyo 2019.

- Axmed (14), Cabdiwahab (13), iyo Cabdiraxiim (12) ayaa booliska Gebilay ay xidheen bishii Sebtember 2019. Waxaana lagu eedeeyay inay ku lug lahaayeen mudaaharaad ka dhacay Kala-Baydh. Ma ay jirin wax caddayn ah sidaa darteed maxkamaddu waxay amartay sii dayntooda.

- Mustafe (14), Saddaam (14) iyo Axmed (14) ayaa lagu xukumay budhcadnimo iyaga oo lagu ciqaabay 6 sano oo xabsi ah, laguna hayay Xabsiga Gabilay. Waxaa la dhegaystay oo la xukumay iyada oo aanay haysan qareen u dooda. Rafcaan ka qaadashada xukunkooda ka dib, ciqaabtoodii waa la dhimay waxaana la sii daayay Janaayo 2020. Laakiin tani waxay ahayd kadib markii ay muddo 3 bilood ah ku xidhnaayeen xabsiga.

- Xamse (14), Ismaaciil (14), Caydaruus (13), iyo Cumar (12) ayaa maxkamada Gabilay ku xukuntay inay dhaawac u geysteen qof waxayna ku ciqaabtay 3 sano oo xadhig ah Janaayo 2020.

- Khaalid (13) iyo Xamse (14) ayay ku xukuntay dil in ay geysteen Maxkamadda Gobolka Gabiley bishii Oktoobar 2018. Maxakamada Rafcaanka Maroodi-jeex way taageertay xukunkan. In kasta oo ay caddaatay in wiilashu ay aad uga yar yihiin in dacwad lagu soo oogo, maxkamaddu way diidey siideyntooda iyada oo ku salaynaysa in ay tixgelinayso "nabadgelyadooda". Taas oo macnaheedu ahaa in odayaasha dhibanahu ay si khaldan u adeegsadeen diyadii taas oo wiilasha khatar gelin karta haddii la sii daayo. Dacwada ayaa ka socota Maxkamada Sare. Khaalid ayaa ugu dambayntii la sii daayay bishii Abril 2020. Waxa lasii daayey Xamse taariikhdu markay ahayd 26 bishii July, 2020.

Iyada oo inta badan carruurta la xidhay ay yihiin wiilal, tiro yar oo gabdho ah oo jira 14 sano ama ka yar ayaa sidoo kale lagu eedeeyay fal dembiyeedyo.

- Samsam (13) waxaa xidhay booliska magaalada Baligubadle waxaana lagu eedeeyay in ay dagaallantay waxaana la sii daayay ka dib markii qoyskeedu ay qaateen heshiis dhaqameed bishii Febraayo 2020.

Haddii carruurtani ay haysan lahaayeen caddeyn qoraal ah oo khusaysa da'dooda, midkoodna lama xidheen, lama eedeeyeen, dacwad laguma soo oogeen, xabsina laguma xukumeen. Dhibaatada ay gaysteen todobaadada, bilaha iyo sannadaha xadhiga ah ayaa laga fogaan kari lahaa.

## Maxaa Loo Bahan Yahay Si Wax Loo Bedelo?

Hadii qoysasku haysan lahaayeen dukumentiyo qoraal ah oo caddaynaya taariikhda ay caruurtoodu dhasheen, waxa ay haysan lahaayeen cadaymaha loo baahan yahay ee rumaynaya in caruurtoodu ay aad u yar yihiin sidaa darteed aan la xidhi karin, dacwad lagu soo oogi karin aan xabsina lagu ciqaabi karin. Fikir ahaan, tani waxay noqonaysaa shahaadada dhalashada oo ay soo saaraan cusbitaaladu isla maalinta ay caruurtu dhashaan. Xaqiiqo ahaan, hadana waxa jirta in tiro badan oo caruur ah, gaar ahaan kuwa degan meelaha ka baxsan magaalooyinka muhiimka ah, in aanay ku dhalan cusbitaal ama aanay helin taageerada umuliso joogta goob caafimaad oo soo saari karta shahaado dhalasho. Ilaa iyo inta Somaliland laga helayo caddayn lagu kalsoonaan karo sida shahaadada dhalashada, caruurta oo ay bulshada, iyo sharciguba, u tix geliyaan in ay aad u da' yar yihiin aan istaahilinna in lagu fuliyo ciqaabta fal dembiyeedku, waxa ay sii ahaan doonaan qaar lagu hayo saldhigyada booliiska loona diro xabsiyada.

# KA MID NOQOSHADA XALKA

## Maxaad Qaban Kartaa Si Aad U Caawiso?

Dhamaanteen waxa aynu leenahay door aynu ka ciyaarno ilaalinta carruurta si aan loo xidhin, eedayn, dacwad loogu soo oogin iyo in aan xabsi lagu xukumin.

- Hadii aad tahay waalid, hubi in aad gacanta ku haysato dukumenti qoraal ah kaas oo muujinaya da'da ilmahaaga, hadii aanad haysan shahaadada dhalashada, hel oo kaydi diiwaanada caafimaadka, diiwaanada dugsiga ama sawiro ay ku shaambadaysan yihiin wakhti kuwaas oo ku siin kara caddayn khusaysa da'da ilmahaaga, hadii ay dhacdo in mar uun la xidho.

- Haddii aanad waalid ahayn laakiin aad weli rabto in aad qayb ka ahaato xalka bulshadaada dhexdeeda, la wadaag macluumaadkan qoyskaaga, asxaabtaada, deriskaaga iyo cidda aad wada shaqaysaan. Waalidka iyo wakiilada caruurtu waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan in caruurta da'doodu tahay 14 sano jir iyo kuwa ka yaryar ay aad uga yar yihiin da'da loo ciqaabi karo fal dambiyeed, laakiin in ay sii socon doonto in ay dhacdo sidaasi hadii aanay jirin hab lagu caddayn karo da'dooda.

- Haddii aad tahay waayeel (Oday)/hoggaan dhaqameed, kaga hadal arrimahan shirarka. Go'aan ka gaadh sida adiga iyo cidda aad wada shaqaysaan aad u awooddaan in aad taageertaan badbaadinta caruurta da'doodu tahay 14 sano jir iyo kuwa ka yar yar si aan loo xidhin oo aan xabsi loo gayn.

- Haddii aad tahay macalin ama aad ka shaqayso dugsi heer kastaba ha ahaatee, la wadaag macluumaadkan waalidiinta ardaydaada. Aadna u hubi in waalidiintu ay garanayaan in sharcigani ka caawin karo caruurta in laga ilaaliyo in ay xabsi galaan dugsigana sii wataan.

- Haddii aad tahay mihnadle caafimaad, u sheeg bukaanadaada muhiimadda ay leedahay diiwaan gelinta dhalashada caruurtooda, lana wadaag iyaga macluumaadka khuseeya sidii hawshan loo qaban karo. Shahaadada dhalashadu kama aha caado caam ah Somaliland, sidaa darteed u sharax bukaanada leh caruur sida loo diiwaan geliyo dhalashada caruurtu waxa ay siinaysaa waalidka dukumentiga lama huraanka ah ee muujinaya da'da ilmahaas, hadii wiilkaas ama gabadhaas la xidho mustaqbalka.

- Haddii aad ka shaqayso Urur aan Dawli ahayn oo ku tacaluqa arrimaha caafimaadka, ku adkee cusbitaalada iyo goobaha caafimaadka muhiimadda ay leedahay diiwaan gelinta dhalashooyinka.

- Haddii aad tahay suxufi ama ka shaqayso mihnadda saxaafadda, waxa aad leedahay door muhiim ah oo aad ka ciyaarto wacyi gelinta bulshada ee xaga sharciga. Soo ogow waxa dhacaya ee khuseeya arrintan ee magaaladaada oo ka qor sheeko. Mar kasta oo bulshadu wax badan ka ogaato in aan sharcigu ogolayn in caruurta da'doodu tahay 14 sano jir iyo kuwa ka yar in la xidho, la eedeeyo, dacwad lagu soo oogo iyo in la xabsi lagu xukumo toona, waxa ay u badan tahay in sharciga la ixtiraami doono.

- Haddii aad tahay sarkaal booliis ah, xeer ilaaliye ama garsoore, adiga ayaa udub dhexaad u ah kor u qaadista sharciga. Hadii ilmo yar kuu sheego in da'diisa ama da'deedu tahay 14 sano ama ka yar, in aad ka soo caddayso odhaahdan waalidka ama wakiilka sharci ee ilmuhu waa talaabada koowaad ee kaalmayn ah. Hadii uu shaki kaaga jiro da'dooda, isticmaalida ikhtiyaarkaaga si aad u go'aamiso adiga oo u eexanaya ilmuhu waxa ay faa'iido u noqon kartaa mustaqbalka ilmahaa ee ka ilaalinta in ay caruurtu galaan saldhigyo iyo xabsiyo ay ka buuxaan dad waaweyn, kuwaas oo tusaale ahaan, ku jihaynaya caruurtu in ay qaadaan dariiq burbur u horseedaya. Dawladdu aad ayay uga awood badan tahay caruurta sharciga khilaafta, xataa kuwa haysta taageero qoys oo awood leh. Dadaal kasta waa in la sameeyaa si loogu isticmaalo quwaddaa iyo awooddaa si loogu sii hayo caruurta dugsiyada, guryaha oo ay la joogaan qoysaskooda iyo in laga caawiyo in ay noqdaan dad waawayn oo mas'uul ah oo wax soo saar leh.

*Waxa aanu soo dhawaynaynaa talobixinaha ka imanaya akhristayaasha ee khusaysa sida arrinta lagaga hadlayo warbixintan loogu faafin lahaa si baahsan dhagaystayaal kala duduwan tiiyoo ujeedadu tahay ilaalinta dhamaan caruurta ku nool Somaliland.*

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603/ +252 711208.***

## NALA SOO XIDIIDH

6th Floor, Omar Hashi Building
Hargeisa, Somaliland
+252 523603/ 0633751063

1st Floor, Sagal Jet Building
Burao, Somaliland
+252 711208

info@thehorizoninstitute.org

**Soo booqo baraha internet-ka**

www.thehorizoninstitute.org

Twitter: @Horizon_SL

Facebook: @HorizonInstituteSomaliland

***Horizon Institute is working to advance the rule of law and human rights. This work was funded by the generous support of the UK Department for International Development (DFID).***

**All photos by Petterik Wiggers**

HORIZON INSTITUTE